

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XM/249-434/042011

DATE 02/04/11

XEER MADAXWEYNE No: 0125/042011

Dhaqan-galka Daabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta  
Kun ee Shilling-ka Somaliland

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 54aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Arkay: Qoraalada codsiga ah ee Gudoomiyaha Baanka Dhexe,

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-  
14/513/2011, ee Ansixinta Daabacaada Noodadka Kun-ka  
iyo Shanta Kun ee Shilling-ka Somaliland.

Wuxuu Soo Saaray,

Dhaqan-galka Daabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta Kun ee Shilling-ka  
Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Xaarega

Mo 34.2011

RL: 72  
**RECEIVED**

03/04/2011



Ref: GW/KF-14/5/3/2011

Date: 02/04/2011

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixin Dabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta**  
**kun ee Shilingka Somaliland**  
**GOLAHA WAKIILADA JSL**

MARKUU ARKAY: Qodobka 54<sup>aad</sup> Farqadiisa 3<sup>aad</sup> ee Dastuurka Qaranka

MARKUU ARKAY: Degreeto M/wayne ee JSI/M/BD/098-412/032011 ee Ansixin Dabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta kun ee Shiling

MARKUU TIXGALIYAY: Baahida loo qabo in Dalka Lacag loo soo Daabaco Noodadka Kun-ka iyo Shanta kun ee Shiling oo loo baahan yahay

MARKUU U CODEEYEY: Ansixin Dabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta kun ee Shilingka Somaliland kal-fadhigii 14<sup>aad</sup> fadhigiisii 29<sup>aad</sup> ee 30/03/2011 oo ay goob joog ahaayeen (47) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

**WUXUU**

Cod aqlabiyad ah (47 cod) oo gacan taag ah ku Ansixiyay Ansixin Dabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta kun ee Shiling halka Cid Diiday aanay jirin ,Cid ka Aamustayna aanay jirin **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

  
**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xog.Guud ee Golaha Wakiilada**



  
**C/raxmaan Maxamed C/laahi**  
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada**

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF. JSL/M/BD/098-412/032011

DATE 21/03/11

Ku: Shir Gudoonka Golaha Wakillada JSL

Hargeysa

Og: Mudane, Cabdi Dirir Cabdi,  
Gudoomiyaha Baanka Dhexe ee JSL

Hargeysa

Ujeedo: Ansixin Daabacaada Noodadka Kun-ka iyo Shanta Kun ee Shillings

Mudane Gudoomiye,

Waxa aan halkan idinku soo lifaaqay qoraalada ay summadohooda kala yihiin 179 iyo 190, kuna taariikhaysan 12/03/2011 iyo 19/03/2011, ee uu soo gudbiyay Gudoomiyaha Baanka Dhexe, kuwaasi oo uu ku codsanayo in la ansixiyo daabacaada lacagta Somaliland ee noodadka cusub ee Kun-ka iyo Shanta Kun ee Shillings (SL.SH. 1000 iyo 5000).

Sidaa darteed, anigoo tix-raacaya Qodobka 54aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, waxaan idin kaa codsanayaa in aad ka gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah.

Allaa Mahad Leh,

  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



RL: 56  
**RECEIVED**  
24/03/2011  
21/03/2011

# BAANKA SOMALILAND

BANK OF SOMALILAND



بنك صومالي لاند

O.K.  
Xirsi

Al  
19

REF 190

DATE 19 MAR 2011

**Ku: Mudane,**  
**Axmed Maxamed Maxamuud**  
**Madaxwaynaha**  
**Jamhuuriyadda Somaliland**  
**Madaxtooyada.**

**OG: Mudane,**  
**Xirsi Cali X.Xasan**  
**Chief of Cabinet ka Madaxtooyada**  
**Madaxtooyada.**

**Ujeeddo: Codsii Soo Daabicista noodhka cusub**  
**(New notes) oo dhan 5000/Sl.sh**  
**(Shan kun Somaliland Shillings).**

**Mudane Madaxweyne,**

Annigoo tixraacaya fikrada ah in loo baahan yahay in la dabaco noodh shan kun Shillings Somaliland ah kana dhalatay kulankii Guddida sicir bararka ee qabsoomay taariikhdu markay ahayd **16.03.2011**, waxaan halkan Idiinku soo gudbinayaa naqshadda noodhka cusub oo dhan Shan kun oo Somaliland Shillings **(New 5000 slshs note)**.

Mudane Madaxweyne, noodhkan cusub oo shanta kun ah naqshadiisa waxna waad ku dari kartaa waxna waad ka dhimi kartaa.

Mudane Madaxweyne, waxaan si xushmad leh u soo jeedinaynaa inaad noo ansixiso daabicista noodhkan.

Anniga oo ku rajo weyn inaad noo soo ansixin doonto soo daabicista noodhkan cusub **(New Notes)**, naga guddoon salaan wacan.

**Abdi Dirir Abdi**  
**(Guddoomiyaha)**

**ALLAA MAHAD LEH.**

19-3-11



5000 SOMALILAND SHILLINGS



Bn1107 07-03-11

BACK OPTION A




B-058 07-03-11



De La Rue

© De La Rue International Limited 2011

PLEASE NOTE - This design is printed from a computer image and the system of reproduction may affect document size and ink colour. Copyright of the images contained in these designs may not have been established. Therefore the designs may change in the future if the copyright in and/or licence to use any images has not been obtained prior to design finalisation.





# BAANKA SOMALILAND

**BANK OF SOMALILAND**



بنك صومالي لاند

REF **179**

DATE **11 2 MAR 2011**

**Ku:- Mudane,**  
**Axmed Maxamed Maxamuud**  
**Madaxweynaha,**  
**Jamhuuriyadda Somaliland**  
**Madaxtooyadda**

**Og:- Mudane, Xirsi Cali X. Xasan**  
**Chief of Cabinet-ka Madaxtooyada**  
**Madaxtooyada**

o.k.  
allh  
13/03/11

**Ujeeddo:- Ansixin soo daabicista noddhka (Note) Cusub ee**  
**Kun shilling Somaliland (Issuance of**  
**"1000 Sh" denominated note)**

**Mudane Madaxweyne,**


Annagoo tixraacayna wadahalkeennii qabsoomay 07/03/2011 ee uu innagu wehelineyey Chief of Cabinet-ka Madaxtooyada ay goobjooggana ka ahaayeen Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka Kowaad ee Golaha Wakiilada. Waxaan si xushmad leh u codsanaynaa in naloo ansixiyo in aanu lacagta shilinka Somaliland ku kordhino noodh ah kun shilling (One thousand Shs denominated note). Waxa aanu halkan ku soo lifaaqnay laba nashqadood (Two Specimens) oo aanu u aragnay inay munaasib yihiin.

Mudane Madaxweyne, labada nashqadood ee aan kuu soo bandhignay waxna waad ku kordhin kartaa, waxna waad ka dhimi kartaa.

Anigoo ku rajo weyn ansixinta soo daabicista noodhkan cusub, naga guddoon salaan wacan.

**ALLAA MAHAD LEH**

**Abdi Dirir Abdi**  
**(Guddoomiyaha)**



HEAD OFFICE: HARGEISA (REPUBLIC OF SOMALILAND)

Tel: 00252-2523298 (Telesom) Fax: 00252-2523019 (Telesom) Tel: 00252-828-53000 (Soltelco) Fax: 002-25236610 (STC)

FRONT COLOUR OPTION A



Bn1067 08-11-10

BACK COLOUR OPTION C



Bn1071 08-11-10



De La Rue

© De La Rue International Limited 2010

PLEASE NOTE - This design is printed from a computer image and the system of reproduction may affect document size and ink colour. Copyright of the images contained in these designs may not have been established. Therefore the designs may change in the future if the copyright in and/or licence to use any images has not been obtained prior to design finalisation.

FRONT COLOUR OPTION B



Bn1066 08-11-10

BACK COLOUR OPTION D



Bn1072 08-11-10



De La Rue

© De La Rue International Limited 2010

PLEASE NOTE - This design is printed from a computer image and the system of reproduction may affect document size and ink colour. Copyright of the images contained in these designs may not have been established. Therefore the designs may change in the future if the copyright in and/or licence to use any images has not been obtained prior to design finalisation.

